

## HABRAACA DOORASHOOYINKA IYO TALLAABOOYINKA LA QAADAYO

**Hawsha doorashada ayaa ku bilaabanaya tababaridda Guddiga Fulinta Doorashooyinka.**

Beelaha ayaa Guddiyada Doorashada ee heer federal iyo kuwa heer dawlad goboleed u gudbinaya liisaska ergooyinka wax dooranaya.

Guddigu waxaa ay muddadan dhegaysanayaan haddii ay jiraan cabashooyin la xidhiidha xulista ergooyinka wax dooranaya iyo musharraaxiinta tartamaya.

Guddiga doorashadu waxaa uu qabanaya codsiyada musharraxiinta xildhibaannimo.

Guddigu waxaa ay diiwaan gelinayaan warfidiyeenka iyo joobjoogayaasha doorashada la soconaya.

Dowlad goboleedyada ayaa soo gudbinaya liiska xubnaha la xulay ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.

Beelaha iyo ergadooda doorashada ayaa soo dhammaystiraya doorashada xubnaha uga mid noqonaya Aqalka Hoose ee Baarlamaanka.

*Waxaa la samaynayaa hubin iyo sixitaan haddii ay jireen qaladaad farsamo oo dhacay inta lagu jiray xulidda iyo doorashada.*

Xubnaha la xulay ee Aqalka Sare iyo kuwa la doortay ee Aqalka Hoose waxaa loo gudbinaya oo ay tegayaan Muqdisho oo fadhiгуудуу noqonayo.

Xubnaha Baarlamaanka ayaa loo dhaarinaya xubnimada baarlamaanka.

Guddoomiyayaasha iyo Guddoomiye kuxigeennada labada aqal ee baarlamaanka; Aqalka Sare iyo Aqalka Hoose ayaa la doorayaa.

Dabadeeedna Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa la dooranaya.

*Muddooyinka u dhexeeya xilliyada ay hawlahani socdaan waxaa dhacaya ololaha doorashooyinka, waxaana musharraxiinta u tartamaya golayaasha baarlamaanka iyo jagada madaxweynuhuna ku mashquulayaan xodxoda iyo soojiidashada codadka codeeyayaasha. Waxaa ay warfidiyeenkuna ku mashquulsan yihii tebinta dhacdooyinka la xidhiidha ololaha iyo doorashooyinka ku dhacaya hannaanka dadban, sida tebinta shirarka beelaha iyo khudbadaha musharraxiintu ay dadka ugu talo galeen iyo warbixinada ay Guddiyada Doorashadu shaacinayaan.*

Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Dadban oo ka kooban laba guddi oo heer federaal iyo heer dawlad goboleed ah ayaa mas'uul ka ah hirgelinta iyo maamulka hannaankan doorasho isla goortaana hubinayana in nidaamka doorashadu u dhaco si xor iyo xalaal ah.